

## **sunaami**

**Xaqiiqada:** Waxaa la bixinayaa digniin tsunami la xiriirta dadka degan Xeebta Pacific ee Gobolka Washington. Sunaamiyada waa hirar taxane ah oo inta badan sababa dhulgariir ka dhasha badda hoose. Xajmiga mowjadahu waxey abuuri karaan hirar xoogan oo waxyeello keeni karaa si fudud, dadkana u qaadi kara.

### **Maxaa la sameeyaa:**

- Haddii aad ag joogto meel biyo horteed ah oo aad dareentid dhulgariir, marka hore naftaada ilaali oo hoosta ka gal miis ama gabal adag ee alaabta agabka guryaha yaala ka mid ah sida furniture ka. Dhulka oo garira waa digniinta Sunaamiga. Marka dhulgariirku istaago, ordod oo dhulka sare u carar. Haddii aanu jirin dhul sare ama wax waqti ah si aad u gaadho dhulka sare, fuul qeybta sare ee qaab-dhismeedka ama dabakhyada is dul saarka ah.
- Marka lagu warsado in aad qaxdo, sidaas yeel isla markiiba. Raac jid kasta oo ogeysiis geeddigu bixinayo. Qaar ka mid ah jidadka waxay yeelan karaan calaamado ku yaala ama ku dherersan waddooyinka iyo jidadka waaweyn.
- Haddii aad gaari ku qaxi weyso, ka tag oo Lugee waxaadna si toos ah u adaa meesha kuugu dhow ee dhulka ugu sareysa. Ka fagoow harooyinka iyo dhulka qoyan, kuwaas oo u nugul daadadka in ay ku soo rogmadaa inta lagu guda jiro argagaxa dabadiisa.
- La soco raadiyaha si aad ula sococto akhbaraadka degdeg ah.
- ***Haddii aad garaneyso qof aan awoodin in uu fahmo, arko, ama aan maqlin farriintan, fadlan u sheeg waxa ay ku saabsantahay***

### **Xiriir kale ee ku caawinaya:**

<http://mil.wa.gov/emergency-management-division/hazards/tsunami>

<http://www.tsunamiready.noaa.gov/>

<http://www.ready.gov/tsunamis>